



LIDA Stories

lidastories.net

**Ka duwanaanshaha sababta
saxda ah / Se démarquer pour la
bonne raison**

✎ LIDA Portugal
🔗 Sunniva Høiby-Øiset
📄 Mohamed Abdirashid (so), Zina (fr)




This work is licensed under a Creative Commons
[Attribution 4.0 International License](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0).
<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0>



**Ka duwanaanshaha sababta
saxda ah
Se démarquer pour la bonne
raison**

✎ LIDA Portugal
🔗 Sunniva Høiby-Øiset
📄 Mohamed Abdirashid
📄 4
💬 Soomaali / français



Edson waxa uu ku dhashay Angola, wax yar uun ka dib markii uu dalkoodu xornimada qaatay. Wuxuu ahaa wiil aad u dheer. Dhererkiisa awgeed ayuu kuwa kale kaga duwanaa. Dadkii hubka siin jiray carruurta si ay ugu dagaalamaan askar ahaan dagaaladii sokeeye waxay doonayeen wiilal isagoo kale ah.

...

Edson est né en Angola, juste après que le pays soit devenu indépendant. C'était un très grand garçon. Il se démarquait à cause de sa taille. Les personnes qui donnaient des armes aux enfants pour qu'ils se battent en tant que soldats dans la guerre civile voulaient des garçons comme lui.



Hadda oo uu qaan-gaaray, Edson wuxuu tababaraa carruurta qaxootiga ah iyo kuwa kale ee laga takooro bulshada. Mar, dhererkiisu waxa uu halis galiyay in uu carruurta la askaraynayo noqdo. Hadda, dhererkiisu wuxuu siinayaa awood uu dadka kale ku caawiyo inay dareemaan ammaan.

...

Maintenant qu'il est adulte, Edson entraîne des enfants réfugiés et d'autres qui risquent d'être exclus de la société. Avant, sa taille le mettait en danger de devenir un enfant soldat. Maintenant, sa taille lui donne de la force pour aider les autres à se sentir en sécurité.



Maalin maalmaha ka mid ah macalin ayaa ogaaday sida uu ugu fiican yahay kubadda gacanta. Waxa uu ku biiray koox kubadda gacanta ah oo uu aad ugu guulaystay. Waxa uu caan ka noqday iskoolka oo uu yeeshay saaxiibo. Wuxuu kaloo noqday qof kalsooni badan.

...

Un jour, un professeur a remarqué à quel point il était doué en basket. Il a rejoint une équipe de basket et a eu beaucoup de succès. Il est devenu populaire à l'école et s'est fait des amis. Il a également gagné en confiance en lui.



Hooyadii waxay ka cabsatay inay kaxaystaan, markaas ayay go'aansatay inay u dirto inuu kula noolaado habaryarti Portugal. Waxay u malaynaysay inuu halkaas ku nabadgeli doono.

...

Sa mère avait peur qu'ils ne le prennent, donc elle a décidé de l'envoyer vivre au Portugal avec une tante. Elle pensait qu'il y serait en sécurité.



Aad bay u adkeyd bilaawgii horre, maadaama Edson uu u xiisay cimilada diiran, cunta dhaqameedka iyo ugu badnaan, laabta gelintii iyo dhunkashada hooyadiis.

...

C'était très difficile au départ, puisque la météo chaude manquait à Edson, ainsi que la nourriture traditionnelle et, surtout, les câlins et baisers de sa mère.



Si fiican ugumuu hadli karin luuqada Boortaqiiska, aad ayeyna ugu adkeyd inuu la socdo fasaladiisa iyo la sheekeysiga saaxiibadiis. Waxa uu iswaydiin jiray in ay tahay fikrad wanaagsan in uu yimaado Portugal.

...

Il ne parlait pas bien le Portugais et trouvait difficile de suivre ses cours et les conversations de ses camarades. Il se demandait si venir au Portugal était une bonne idée après tout.